

# Usbuuca ugu horeeya ee nolosha

## Hagaha waalidka

### Ilmaaga dhawaan dhashay miyuu fiican yahay?

#### Dhallaan caafimaad qaba:

- wuxuu leeyahay bushimo casaan ah iyo carrab casaan ah
- heerkulka kilkishooda waa inta u dhaxaysa 36.8°C iyo 37.3°C, taas oo la mid ah kaaga
- waxay u kaadiyaan (kaadi) oo ayna u saxaroodaan (xaaraan) si joogto ah.
- marar badan ayuu wax quutaa, 8 ilaa 12 jeer 24-kii saacadood
- si deggan ayuu u foojignaadaa marka uu soo jeedo wuuna ka falceliyaa dhawaaqyada iyo codadka
- neefsashadooda xoogaa yar way ka boobsiis badan tahay taada hakad yar ayaana ku jira
- waxay muujiyaan calaamado marka ay dhibtoonayaan oo ay u baahan yihiin caawimo, sida beddelka midabka, oohinta, ruxrux ama gariir.

### Ilmaaga dhawaan dhashay ma xanuunsan yahay?

Haddii ilmahaagu:

- uu neefsashada joojiyo ama buluug isu beddelo
- uu leeyahay qalal, jareys ama gariir oo indhaha, afka, gacmaha ama lugaha ah
- aanan hurdada laga toosin karin
- uusan dareemeyn sanqadh dheer, iftiin dhalaalaya oo indhahooda ka kor ifaya ama qajaruufo yar oo gacanta laga qanjaruuftay.

### Usbuuca ugu horeeya ee nolosha

Haddii ilmahaagu:

- uu leeyahay maqaar jaalle ah 24-ka saac ee ugu horeeya dhalashada kadib
- uusan waxba quudan in ka badan 6 saacadood ka dib 24 saacadood ee hore
- uusan ugu yaraan 1 mar kaadin uusana saxatoon 24-ka saac ee ugu horeysa
- uu leeyahay dhaqdhaqaaq gariir camal oo indho, af, gacan ama lugaha ah
- uu muuqdo in jidhka, madaxa, qoorta, gacmaha iyo lugaha iyo daciif yihiin
- uu si boobsiis ah u neefsanaayo uuna sameynayo shanqadh guux ah
- uu u ooynayo si aan caadi ahayn - sida daciifnimo, qaylo sare, oohin xanuun badan
- ay saxaradoodu dhiig leedahay
- uu maqaarkiisu cadaado ama huruud isu bedelo
- calooshooda (caloosha) ama gunta laabta ayaa is gasha marka ay neefsanayaan
- uu wax badan matagayo - in ka badan kala bar wixii uu quutay 3dii quudin ee ugu dambeeyay.
- uusan matagu eheen mid cad, caano ama jaalle huruurd ah ahayn

Cadaan	Caano	Jaale Huruud Ah	Mustard	Cagaar	Cagaar	Cagaar	Cagaar	Dhiig
--------	-------	-----------------	---------	--------	--------	--------	--------	-------

AMA

- waxaad dareemaysaa inay wax khaldan yihiin

### Ficilka

#### Isbitaalka

Isla markiiba usheeg umulisadaada ama dhakhtarkaaga, ama taabo badhanka wacitaanka caawinta

#### Guriga

Taleefanka 000

### Ficilka

#### Isbitaalka

U sheeg umulisadaada ama dhakhtarkaaga.

#### Guriga

- Khadka Hooyada iyo Dhallaanka oo 24-saac ah Taleefanka 13 22 29
- 24-saac Kalkaaliso-la-wickaro Taleefanka 1300 60 60 24
- U tag dhakhtarkaaga deegaankaaga (GP)
- Aad Waaxda Gurmadka Degdegga ah ee Isbitaalka
- Haddii ay xaaladu degdeg tahay, wac 000

**Fadlan ogow:** Marka lagu daawado shaashadda iyo/ama la soo dejijo oo la daabaco, midabada jaantusku way kala duwanaan karaan waxayna ku xiran tahay goobaha qalabkaaga.

Reference: Morley CJ, Thornton AJ, Cole TJ, Hewson PH, Fowler MA. Baby Check: a scoring system to grade the severity of acute systemic illness in babies under 6 months old. Arch Dis Child. 1991 Jan;66(1):100-5. doi: 10.1136/adc.66.1.100.